

Daawooyinka Qaaxada Qarsoon (Latent TB): Rifampin (RIF)



Waxaad kaliya qaadan doontaa daawadaada hal mar toddobaadkii ilaa muddo 4 toddobaad ah.

Waxaad isku mar la qaadan doontaa kiniinkaaga maalinlaha ah.

U sheeg dakhaatiirtaada kale inaad daawo u qaadanayso qaaxada aan firfircoonayn.

Daawada	Tirada kiniinka maalin kasta
Rifampin	

Waxaan maalin kasta qaadan doonaa daawadayda muddo 4 bilood ah



Waxaad qabtaa qaaxo qarsoon oo ah nooc ka mid ah caabuqa qaaxada. Ma qabtid cudurka qaaxada oo mana u gudbin kartid dadka kale. Daawadaan ayaa kaa caawin doontaa ka hortagga cudurka qaaxada ee firfircoon.




Wac kalkaalisadaada caafimaadka haddii aad qabto su'aalo ama waxyeello:



JOOJI qaadashada daawooyinkaaga isla markaaba oo WAC kalkaalisada cudurka qaaxada haddii aad qabto mid ka mid ah dhibaatooyinka hoose:

- Cunto yari ama oomateeg la'aan
- Calool xanuun ama calool kacsanaan
- Lalabbo ama matag
- Kaadida midabka koolaha u eg ama saxaro
- Maqaarka ama indhaha oo jalle noqdo
- Nabaro ama dhiigbax
- Finan ama cuncun
- Tabar dari daran ama daal
- Qandho wato
- Madax xanuun ama jir xanuun
- Dawaqaad
- Jidhidhico iyo kabuubyo gacmahaaga ama cagahaaga ah

FIIRO GAAR AH: Waa CAADI haddii kaadidaada, candhuuftaada, ama ilmadaadu isku beddelaan midabka oranjiga ah. Muraayadaha lens-ka indhaha ayaa laga yaaba in ay wasakhoobaan ama midabkooda beddelmaan.



Tallooyin ku aadan qaasha RIF

- Samayso alaarm si uu ku xasuusiyo inaad qaadato daawadaada
- Qaado daawadaada iyada oo calooshaada madhantahay
- La hadal dhakhtarkaaga haddii aad cabto khamri, khamrigu wuxuu keeni karaa waxyeelooyin kale
- U sheeg dhakhtarkaaga dawooyinka kale ee aad qaadato
- Weydii kalkaalisadaada haddii aad wax su'aalo ah qabto